Vänersborgs kommun
Birger Sjöberggymnasiet

Vad är modersmålsundervisning?
Maxay tahay Barashada afka hooyo?

Barashada afka hooyo waa maaddo aad leedahay in aad ku barato dugsiga asaasiga iyo dugsiga sare.
Barashada afka hooyo ee heerka dugsiga sare waxaa loo qaybiyay saddex koorso(kurser): Dardar gelinta labada luqadood, Afka hooyo A iyo Afka Hooyo B.
Ujeedada waa in ardayda ka faa-iidaystaan hawsha dugsiga isla markaasina sare u qaadaan labada luqadood ee aqoonsigooda ah si ay u sameeyaan horumar iyo isku kaalsooni.
Barayaasha afka hooyo dhigaya waa kuwo ardayda ay isku dhaqan yihiin sida badanne isku meel ka yimideen. Sidaasi oo kale barayaasha afka hooyo waa in ay aqoon fiican u leeyihiin Afka iyo Bulshada Iswidhishka.
Vem ansvarar för stöd, undervisning och studiehandledning?
Kumaa xil ka saaran yahay taageerada, waxbarashada iyo talo bixinta waxbarasho?

Degmada ayaa mas-uul ka ah daryeelka caruurta iyo dugsiyada. Marka la eego qaanuunka waxbarashada, degmada ayaa mas-uul ka ah isku duba ridka barashada afka hooyo haddii degmda laga helo ugu yaraan koox dhan shan arday iyo barayaal ku haboon. Taasi ma khusayso luqadaha Qaranka ee laga tirada badan yahay*,samiska,meänkieli, finska, jiddisch iyo romani chib, halkaasi oo ay tirada ardayda sii yaraan karto. Waxbarshada afka hooyo waxaa la isku habayn karaa dhawr dugsi si loo helo koox dhan.
Maamulaha dugsiga ayaa go'aaminayo haddii arday uu baranayo afka hooyo

*Iyada oo la raacayo qaanuunka EU ee sanadkii 2000, kuwani waa luqadaha qaranka Iswidhan ee laga tira badan yahay; samiska, meänkieli, romani chib, finska iyo jiddish.
Vem kan få stöd, undervisning och studiehandledning på sitt modersmål?
Kumaa heli kara taageerada, waxbarashada iyo tala bixinta waxbarasho ee afkiisa hooyo?
Dhammaan ardayda kula hadasha walidiintooda ama dadka kale ee xanaaneeya luqad aan Iswidhish ahayn marka ay guryaha joogaan ayaa heli kara barashada afkiisa hooyo.
Luqadaha laga tirada badan yahay, xataa barashada waa la siin karaa ardayda aanan luqadda ku hadllin marka ay guriga joogaan.
Taasi xataa waxay khusaysaa caruurta lakoriyo -_la kafaalo qaado(adoptivbarn) .
Ardayga wuxuu xaq u leeyahay barashada afka hooyo todobo(7)sanad dugsiyeed inta uu waxbaranayo guud ahaan.

Xadeyntaas ma khusayso arday qabo baahi gaar ahaaneed, ee barashada afka hooyo sida luqad casri ah ama doorasho gaar ahaaneed u leh ama samiska, meänkieli, romani chib, finska ama luqad kale ee ka mid ah luqadaha waqooyiga (nordiskt språk) sida af hooyo .

Ardayga hela barashada afka hooyo wuu wadanayaa barashadeeda xataa haddii ay ka istaagto isticmaalkeeda maalinlaha ah. Taasi oo loo hanweyn in ardayga helo aqoon fiican ee afka hooyo ah, iyo in isaga ama iyada ay helaan rajo waxbarasho oo wanaagsan.

Kurser
Koorsooyin

Dugsiga Sare ee Birger Sjöberg wuxuu bixinayaa koorsooyinka kala ah: Dardar gelinta labada luqadood oo ah 50 dhibcood, Afka Hooyo A 100 dhibcood iyo Afka Hooyo B 100 dhibcood.
Barashada afka hooyo waxaa loo dhiganayaa si luqad casri ah ama doorasho gaar ahaaneed ee ma ahan barnaamij dhico badsi ah(utökat program).Barashada afka hooyo kama mid ah in ka badan hal luqad in uu barto arday.

Ha yeeshee arday roomani (romsk elev) ah ee ka yimid dalka dibadiisa wuxuu heli karaa barashada labo luqadood, haddii ay jirto sabab gaar ahaaneed.
Koorsada arday dooranayo waxay ku xirantahay aqoontiisa hore iyo baahida mustaqbal . Taasi waxay keeni kartaa in la is raaciyo koorsooyinka.
Shahaadada waxaa la bixinayaa ka dib marka koorsada dhammaato .
ML 1201- Aktiv tvåspråkighet - 50 poäng
ML 1201- Dardar gelinta labada luqadood oo ah 50 dhibcood
Koorsada dardar gelinta labada luqadood waxay ardayda u suurtagelinaysaa in ay u isticmaali karaan hawl-nololeedka iyo daraasadda. Waxbarashada waxay ka soo baxdaa himilada ardayda iyo baahida iyo ujeedada waxbarashadooda.
Ardayda waxaa u suurta gal ah in ay darsaan qoraal oo ay horumariyaan erayadooda luqadda iyo in ay ku xiraaan ujeedada daraasadooda.
ML 1202-Modersmål A – 100 poäng
ML 1202-Afka Hooyo A oo ah 100 dhibcood
Koorsada Afka Hooyo A waxay dhisaysaa waxbarasho dheeraad ah ee dugsiga asaasiga ama aqoon u dhiganta .
Afka hooyo macnahiisu waa aqoonsigaada qiima weynne u leh waxbarshadaada.
Sidaasi oo kale koorsada waxaa ka mid ah akhris qoraallo kala duwan oo ah adeegsiga luqadda hadal iyo qoraalba iyo kaalinta luqadda ee waxbarasho .
ML 1203-modersmål B- 100 poäng
ML1203- Afka Hooyo B oo ah 100 dhibcood
Koorsada Afka Hooyo B waxay horay u sii kobcinaysaa awoodda luqadeed ee ardayda waxayna siinaysaa aqoon sal ballaaran ee ku saabsan dhaqanka iyo bulshada ay ka soo jeedaan iyo weliba xaaladaha kooxaha laga tirada badan ee Iswidhan .
Koorsada waxaa kale oo ay muujinaysaa sida luqadda iyo suugaanta ay uga tarjumayaan bulshada iyo dhaqanka.
Hur ansöker man om en plats för sitt barn?
Sidee qof ugu codsanayaa boos ubadkiisa?
Waalidiinta caruurta da'da yar (minderåriga) waxay la xiriirayaan dugsiga ama degmada si ay uga waraystaan barashada afka hooyo .
Waalidiinta ayaa go'aanka leh haddii qof doonayo barashada afka hooyo .
Barashada afka hooyo waa ikhtiyaari(frivillig) waana bilaash oo lacag ma ahan.
Codso barashada afka hooyo adiga oo iska tallaab (X) saarayo afar geeska(rutan) ku yaal foomka codsiga ee dugsiga sare .

För anmälan och information
Kontakta modersmålsansvarig

Wixii waraysi iyo warbixin ah la xiriir
Mas-uulka waxbarashada afka hooyo

Suzanne Nordin-Eriksson
Tel: 0521-72 17 93, 721531
E-post: suzanne.nordin.eriksson@edu.vanersborg.se

Välkommen till Birger Sjöberggymnasiet
Ku soo dhowaada Dugsiga Sare ee Birger Sjöberg